IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad Muqdisho 25 Janniaayo 1980 L. 3 R 1

FAAFINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMUHU : waa 5 shilin lambar waliba RUKUNKA : Sanadkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibadaba waa Sh so. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa laba Sh — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta wxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 14 ee 19 Luuliyo 1979, Cad dhul Dawladeed oo ku yaal Degmada Hodan, oo loo oggolaaday dhismihiisa Jaalle Faaduma Cabdi Cilmi Bogga 114

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 15 ee 6 Diseenbar 1979 Siismo dhul Dawladeed la siiyey Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta kuna yaal Muqdisho, Degmada Kaaraan kuna fadhiya mq. 57.000. » 116

Wakaaladda M. Qaranka

QAYBTA SEDDEXAAD

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 10.1.1980 » 118
Lumid Buug Kayd L. 5954 ku qoran Shs. 874 uu leeyahay Maxamed Cali Bucul L. 6

MAXKAMADDA GOB' DEG' BERBERA 13.1.1980 » 121
Lumid Jeeg Wareega L. 14017 kuna qoran Sh. So. 9640/= uu leeyahay Maxamed Ibraahim Degan L. 7

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR 13.1.1980 » 120
Lumid Buug Kayd L. 11.484 ku qoran Sh. So. 31.700/= uu leeyahay Maxamed Jaamac Maxamed L. 8

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 15.1.1980 » 122
Lumid Buug Kayd L. 11.523 ku qoran Sh So. 6.580 uu leeyahay Abshiro Jaamac Yuusuf L. 9

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 22.1.1980 » 119
Lumid Laba Jeeg Wareega L. kala ah 204478 iyo 204477 ku qoran yihiin 45.000 iyo 50.000/= uu leeyahay Cabdi Nuur Axmed L. 10

XEER Wasaaradda Hawlaha Guud L. 14 ee 19 Luuliyo 1979 Cad dhul Dawladeed oo ku yaal Degmada Hodan oo loo oggolaaday dhismahiisa Jaalle Faaduma Cabdi Cilmi,.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA *IYO* DEGAANKA *MAGAALEEYNTA*

ISAGGOO ARKAY: Xaanshada Koowaad tii labaad iyo tii labaad iyo tii saddexaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lamb. yihiin 17, 18, 19 ee 1 Luuliyo 1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lamb. 41 soona baxay 13 Seteember 1973 oo ku saabsan oggolaanshaha dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb. 6 soona baxday 9 Jennaayo 1967 oo la xiriira qiimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY: Arigii codsiga ahaa ay keensatay Faaduma Cabdi Cilmi taariikhdu markay ahayd 19.4.1967, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dawladeed oo ku yaal (Muqdsiho) Degmada Hodan;

ISAGOO AQOONSAN: Caddaynta dhulka kuna saabsan cad dhul Dawladeed ah, ee uu weydiistay Jaallahaas ogeysiis ahaana loogu Faafiyey looxa Dawladda Hoose ee Xamar, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY: Naqshadda lamb. 3095, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dawladda Hoose ee Muqdisho — fadhigoodii 11aad taariikhdeeduna ahayd 5 Sebteember 1067;

ISAGOO ARKAY: Bolleetada lamb. yahay 96587 ee 31.10.1967 kuna soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Faaduma Cabdi Cilmi ay bixisay lacag dhan Sh So. 1.172,25=/ kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO ARKAY: Dhulka la weydiistay oo ku fadhiya mq 1.172,25/= tilmaan cadna laga siiyey Faaduma Cabdi Cilmi sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada dhulka ee W. H. G. (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 7. 11. 1967;

ISAGOO ARKAY: Warqadda ku qoran qaynuunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmaameysa dhulka isaga ah;

X E E R

Waxaa cad dhul Dawladeed la siiyey Faaduma Cabdi Cilmi dhul ku yaal Degmada Hodan, kuna fadhiya mq. 1.172;25/= Muqdisho, 19. Luuliyo 1979.

K/S. WASIIRKA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
W. S. MAXAMED BURAALE ISMAACIIL

Waan aragnay ee diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 1 Bogga lamb. 35
Muqdisho, 26 Luuliyo 1979
Hantidhowraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

Xeer Wasaaradda Hawlaha Guud L. 15 ee 6 Maajo 1979 Siismo dhul Dawladeed la siiyey Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta — kuna yaal Muqdisho, Degmada Kaaraan kuna fadhiya mq. 57.000.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEEYNTA

ISAGOO ARKAY : Xaashada 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 14 ee 3 Juunyo 1962 iyo beddelaaddii ka dambeeyey kuna saabsan Nidaamka Maamulka Guud ee Dawladda (Ordinamento del Governo);

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 17, 18 iyo 19 ee 1 Luuliyo 1976 kuna saabsan Habka Maamulka Guud ee Dawladda oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 41 soona baxday 1 Nofeember 1973 Sharciga dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. 6 soona baxday 9 Jennaayo 76,

ISAGOO ARKAY : Warqadda lamb. yahay WBI/7679/-4162 taariikhdeeduna ahayd 26 Nofeember 1978 ee ay soo qortay WASAARADDA BOOSTADA & ISGAARSIINTA oo ay ku weydiisaneeyso in la siiyo dhul laga dhiso saldhig (Earth Station) oo lagula shaqeyn doono dayaxgacmeed (Sattelito);

ISAGOO ARKAY : Warqadda hubsimada dhulka soo sameeyeen Inj. Cabdikariim Cige Guuleed iyo Sah. Cali Axmed Maxamed ka tirsan Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhul ku fadhiya mq. 57.000/= kuna yaal Muqdisho — Degmada Kaaraan — Taariikhdeeduna ahayd 17. 12. 1978;

X E E R

Waxaa la caddeynayaa in la siiyey WASAARADDA BOOSTADA & ISGAARSIINTA Dhul Dawladeed ee Cabirkiisuna yahay Mt. 250X228 wuxuuna la mid yahay mq. 57.000/= kuna yaal Muqdisho — Degmada Kaaraan.

SOOHDIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU TILMAAMAN

Waqooyi waxaa ka xiga : WADDO

Koonfur waxaa ka xiga : WADDO

Galbeed waxaa ka xiga : WADDO

B A R I waxaa ka xiga : WADDO

Muqdisho 6 Maajo 1979

K/S. WASIIRKA
WASAARADA HAWLAHA GUUD

W. S. MAXAMED BURAALE ISMAACIIL
Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diinwaan lamb. 1 Bogga lamb. 4
Muqdisho 14. Maajo 1979
Dr. Yuusuf Cali Nuur
Hantidhowraha Guud KMG.

QAYBTA — SADDEXAAD
TALOOYIN ISGAARSIIN IWM

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA

HADDUU AKHRIYEY : dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY : in Buuga Keydka dhumay oo lambarkiisu ahaa 5954 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 874 uu iska lahaa Maxamed Cali Bucul sida ku cad warqadda lamb. 189 Taariikhdeedu 10. 1. 1980 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad.

HADUU ARKAY : Qod. Sharciga lamb. 2 ee 9. 9. 1965

HADUU ARKAY : Qod. Sharciga lamb. 2 ee 9. 9. 1965

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Buuga Keydka) 5954 oo ku qoran Magaca Maxamed Cali Bucul ayna ku jirto Sh. So. 874/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo keydka laanta 3aad u beddelo Maxamed Cali Bucul (buugga keydka) ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 30 Maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 10. 1. 1980

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 6

MAXKAMADDA GOBOLKA DEGMADA BERBERA

MGDB/ F/13/80

MARKAAN ARKAY : Arjiga uu soo qortay Jaalle Jaamac Maxamed Ibraahim, degan Degmada Berbera taariikhdu markeey ahayd 15. 1. 1980

MARKAAN ARKAY; Warqadda Bangiga Ganacsiga & Kaydka Degmada Laanta Berbera Taariikh 12. 1. 1980

MARKUU ARKAY : Qod. 69 L. 9. 9. 1965 L. 2 waxaa caddaatay in Jeegga Wareega Lr. 14017, lacagtiisuna tahay 9.640/=oo lumay taariikhdu markay ahyd 28. 2. 1979

In loo cusbooneysiiyo mar kale Jeegga kor ku xusan muddo 30 Cisho ah kadib markii lagu qoro Faafinta Rasmiga ah haddaan la hayn qof sheegta waa in gacanta laga saaro ninka magaciisu kor ku xusan yahay ama qof ka wata awood sharci ah 30ka beri waa in la sugo.

Berbera 13. 1. 1980

(SHAWQI CILMI CALI)
GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOL DEG. BERBERRA

L. 7

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA

HADUU AKHRIYEY : Dacwadda kor ku qoran;

HADUU HUBSADAY : In Buuga Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 11484 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 31.700 uu iska lahaa Maxamed Jaamac Maxamed sida ku cad warqadda lamb. 189 Taariikhdu 13.1.80 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad.

HADUU ARKAY : Qod. Sharciga lamb. 2 ee 9. 9. 1965

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Buuga Keyd lamb. 11484 oo ku qoran Magaca Maxamed Jaamac Maxamed ayna ku jirto Sh. So. 31.700/

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 3aad u beddelo Maxamed Jaamac Maxamed Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan kayarayn 30 Maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho 18. 1. 1980

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 8

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA

HADUU AKHRIYEY : dacwadda kor ku qoran;
HADDU HUBSADAY : in Buuga dhumay oo lambar 11523 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna qorneyd lacag dhan Sh So. 6.580 uu iska lahaa Abshiro Jaamac Yuusuf sida ku cad warqadda lambarkeedu 99 Taariikhdeedu 14. 1. 1980 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad.
HADUU ARKAY : Qod. Sharciga lamb. 2 ee 9. 9. 1965

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Buuga Keydka lamb. 11523 oo ku qoran Magaca Abshiro Jaamac Yuusuf ayna ku jirto Sh. So. 6.580,00

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo keydka laanta 3aad u beddelo Abshiro Jaamac Yuusuf Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaago maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 15. 1. 1980

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA

HADUU AKHRIYEY : Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY : in Jeega dhumay oo lambarkiisu ahaa 204478 — 204477 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 45.000 iyo 50.000/= uu iska lahaa Cabdi Nuur Axmed sida ku cad warqadda lambarkeedu 814 taariikhdeedu 21. 1. 80 oo bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Burco

HADUU ARKAY : Qod. Sharciga lamb. 2 ee 9. 9. 1965

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Jeegaga) lambarkooda yahay 204478 iyo 204477 oo ku qoran Magaca Cabdi Nuur Axmed ayna ku jirto Sh. So. 45.000 iyo 50.000/=.

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Burco u beddelo Cabdi Nuur Axmed Jeegaga ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaaliyeed haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 22. 1. 1980

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 10

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR
GUDOOMIYAHA

HADUU AKHRIYEY : Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY : in Buuga Keydka dhumay oo lambarkiisu ahaa 10.742 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qornayd lacag dhan Shs. So. 1.200/= uu iska lahaa Xasan Maxamuud Maxamed sida ku cad warqada lamb. 042199, taariikhdu 15. 12. 1979 oo bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 5aad.

HADDII UU ARKAY : Qod. 69 sharciga lamb. 2 ee 9. 9. 1965.

WUXUU XEERIYEY

In la baabiyo (Buuga Keydka) lamb. 10742, oo ku qoran magaca Xasan Maxamuud Maxamed ayna ku jirto Sh So. 1.200

WUXUU FASAXAY

In bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xarunta u beddelo Xasan Maxamuud Maxamed buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 30 maalmood, maalinta go'aankan lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyada Demoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 16. 12. 1979

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 11

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR
GUDOOMIYAHA

HADDUU AKHRIYEY : Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY : in Buuga Keydka dhumay oo lambarkiisu ahaa 9623. lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 13.901/= uu iska lahaa Cali Cabdi Haaruun sida ku cad warqadda lamb. 000021 Taariikhdu tahay 6. 1. 1980 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta

HADDII UU ARKAY : Qod. 69 sharciga lamb. 2 ee 9. 9. 1965.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Buuga Keydka) lamb. 9623 oo ku qoran Magaca Cali Cabdi Haaruun ayna ku jirto Sh. So. 13.901/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xarunta u beddelo Cali Cabdi Haaruun (Buuga Keydka) ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 30 maalmood, maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyada Demoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 17. 12. 1979

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BENAAIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax